

# warbixin



XILLIGA ISKA-TALLAALISTA CUDURKA [COVID-19] • MARS 2021

## Digniin ku saabsan dhacdooyinka khayaanada ku salaysan oo tallaalka xiriir la leh

Maadaama waayahaan dambe ay jiraan tiro dad badan oo rabaan in cudurka [Covid-19] laga tallaalo, ayaa waxaa xaaladda ka faa'iidaysto khayaanooleyaal/been-abuureyaal. Toddobaad kasta waxaa ciidanka booliska la wargeliyaa dhacdooyin xiriir la leh isku-day khayaano, taasoo badi ahaan khadka taleefanka ka dhacdo. Khayaanooleyaasha/been-abuureyaasha hab joogto ah ayay ugu mashqulsan yihiin sidii ay u heli lahaayeen hab cusub ay dadka ku khayaameeyaan, taasoo ah hadba xaaladda adduunka u ku sugan yahay, laakinse laba qodob mar kasta soo xasuuso haddii qof tallaalka dartiisa u kula soo xiriiro:

1. Ogow in iska tallaalka cudurka ay tahay lacag la'aan. Haddii qofka kula soo xiriiray u lacag rabo macnaha waxaa weeyaan waa arrin khayaano ku salaysan.
2. Marna ma dhic karto in qof ka hawlgala xarumaha daryeel-caafimaadeedka u si lamafilaan ah khadka taleefanka kala soo xiriiro, kaddib ka codsado in aqoonsigaaga aad ku caddayso farsamada digitalka sida qalabka bangiga [bankdosa] ama [bank-id], sabab kasta ha ahaatee.

## Haddii si lama filan ah u qof kula soo xiriiro sidatan sameey

Hab fudud laguma shaacbixin karo qofka khayaanooleha/been-abuureha ah, siiba haddii xog adiga ku gaar ah u ka war qabo. Kalsooni ayuu kugu abuurayaa wuxuuna ka dhaadhacsiinayaa in arrinta ay tahay arrin degdeg. Ulajeedada waxay tahay in kadeedis lagugu abuurto oo sidaas go'aanno aan sax ahayn ku gaarto. Haddii qof si lamafilan ah u kula soo xiriiro:

- Ha guda-gelin/ha isticmaalin aqoonsiga farsamada digitalka ku salaysan
- Ha siinin xogta koodadka sida lambarrada
- Ku dhig taleefanka

Kahor ka fikir sidii aad ula dhaqmi lahayd haddii qof u si lamafilaan ah khadka taleefanka kaala soo xiriiro, kaasoo ka codsado in aqoonsigaaga aad farsamada digitalka ku caddayso ama ku warsado xogta koodadka sida lambarrada ee adiga ku gaarka ah.

## Haddii lagu khayaameeyo

Haddii lagu khayaameeyo waa inaad daahid la'aan la xiriirta bangiga aad akawntiga ku leedahay. Wargeli ciidanka booliska waxaana caawinaad ka codsata dadka agagaarkaaga ku sugan. Haddii dhacdada dambifalka lagu guda jiro garaac 112. Haddii xaalad degdeg ah ay jirto wac 114 14.

## Warbixin dheeraad ka aqriso barta internetka polisen.se

Warbixinta aad aqrisatay kala sheekeeyso dad kale sidii loo joojiyo dhacdooyinka dambifallada ku salaysan awgood. Warbixin dheeraad oo ku saabsan noocyada khayaanadaha/been-abuuryada kale ka aqriso barta internetka polisen.se [polisen.se/bedrageri](https://polisen.se/bedrageri)